
DISCOVER
ITS BEAUTY

Qaybta 1aad



# KALIYA TALLOOYINKA AYSBAAGA

DR. NAJI IBRAHIM



# Kitaabka madaxa buurta barafka ah

**'waxay' …**

- Waxay nagu dhiirigelisaa inaan dadka kale u lahaano niyad wanaagsan, dabeecad wanaagsan, iyo dareen naxariis leh.
- Waxay nabaraysaa inaan dadka kale cafino, oo aan dadka kale la jeclaano waxaan nafteena la jecel nahay.
- Waxay nagu boorinaysaa inaan u dhoola cadayno si daacad ah oo aan farxad iyo yididiilo wanaagsan muujino.
- Waxay nagu hagaysaa inaan dadka kale kula dhaqano oo kula macaamilno si xushmad iyo ixtiraam leh.
- Waxay na faraysaa in aynu lahaano edaab iyo dhaqan wanaagsan kulana dhaqno dadka kale.
- Waxay na baraysaa inaan u dabacsanaano xayawaanada, shimbiraha, iyo deegaanka.
- Waxay na faraysaa inaan ixtiraamno oo daryeelno waalidkeenna iyo waayeelada, oo aan u wanagsanaano xaasaskeenna, carruurteena iyo xubnaha kale ee qoyska.

**Ma jeceshahay in aad wax badan ka ogaato 'Talooyinkaas'?! aan idin la wadaago iyana…**

- Waxay nagu dhiirigelisaa inaan caawinno, quudinno, oo taageerno, kuwa taagta daran, kuwa saboolka ah, kuwa baahan, iyo kuwa naafada ah.
- Waxay nagu hagaysaa inaan noqono deeqsiyaal, samafalayaal, gargaarayaal, oo iskaashi sameyno.
- Waxay nagu boorinaysaa inaan noqono kuwa wanaagsan anagoo isku hawlayna shaqooyinka iskaa wax u qabsada ah iyo adeegyada bulshada.
- Waxay noo sheegaysaa in bini'aadamka ugu fiican ay yihiin kuwa ugu faa'iidada badan bini'aadamka kale.
- Waxay caddaynaysaa in kuwa dadka ugu sharafta iyo karaamada badan yihiin kuwa ugu cibaado iyo xaq dhawrista badan, oo qalbigoodu nadiif ka yahay xaasidnimada, nacaybka iyo isla waynida.
- Waxay nagu dhiirigelinaysaa inaan fikirno, u dhug yeelano, sababayno, oo aan ku salayno iimaankeena iyo qiimaynteena ee cadaymaha cadcad.



**Inta aanan daaha ka qaadin sirta, aan sidoo kale tilmaamo...**

- Waxay ina baraysaa in bini`aadamka dhammaan ay simanyihiin iyada oo aan loo fiirinayn jinsiyadooda, midabkooda, ama dhalashadooda.
- Waxay mamnuucaysaa dhammaan noocyada midab-takoorka, faquuqa heerka dhaqaale ku salaysan, iyo cunsuriyadda.
- Waxay ina faraysaa in aan ilaalino amniga, fidinno nabadda, oo aan nabad iyo wada noolaansho ugu noolaano dhulka.
- Waxay ina faraysaa in aynaan cid kale ku xad-gudbin ama xadin lacagtooda ama hantidooda.
- Waxay innaga mamnuucaysaa dilka dadka aan waxba galabsan, iyo sidoo kale khiyaanada, dhagarta, iyo jebinta heshiisyada.
- Waxay ina faraysaa in aynu iska ilaalino nacaybka iyo colaadda dadka kale.
- Waxay ina faraysaa in aynaan wax yeelin, xumaynin, ku jeesjeesin, ama aynaan yasin dadka kale.
- Waxay ina faraysaa in aynaan wax khiyaamin, been sheegin, ama aynaan dadka kale malo xun ka malaysanin.
- Waxay nagu hagaysaa run sheegida, cadaaladda, aaminaadda, deeqsinimada, iyo dhawrsanaanta.
- Waxay na faraysaa inaan ilaalino xiriirka wanaagsan ee aan la leenahay kan abuuray, naftayada, iyo kuwa kaleba.
- Waxay na faraysaa in aynu rumayno Alle (Ilaaha kaliya ee xaqa ah), kan wax walba abuuray, oo aynu caabudno isaga oo keliya.
- Waxay na baraysaa inaan rumayno dhammaan Rususha iyo Nabiyadii Alle oo ay ka mid yihiin Aadam, Nuux, Ibraahim, Muuse, Ciise, iyo Muxammad (nabadgelyo iyo naxariis Alle korkooda ha ahaate).

**Xaqiiqdi, waxay horseedeeysaa runta kama dambeysta ah iyo guusha, xasilloonida qalbiga ee runta ah, farxada dhabta ah, badbaadada, iyo nolosha waaraysa.**

**Hadda, aan kuu sheego waxa 'talaadaas' tahay…** →



Masjidka Xaramka, Makkah, Sacuudi carabiya

# Islaamku Waa!

**Caqliyadu hadday tahay mid horey wax ka aaminto ama caqli-yar, waligood ma fahmi doonaan quruxda iyo runta Islaamka!**

Waxaa laga yaabaa in akhristayaasha qaarkood ay horeba u aaminsanaayeen fikrado xun oo ku saabsan Islaamka.

Waxaa laga yaabaa inay u arkeen oo kaliya sida ay saxaafadu u soo bandhigtay, iyadoo diiradda saaraysa argagixisada- kuwaas yari waxay noqon doonnaan argagixiso diinta ay doonaan ha haystaane.

Waxaa laga yaabaa inay diinta Islaamka ka akhriyeen ama ka maqleen ilo aan sax ahayn ama eex ku jirto.

Si kastaba ha ahaatee, haddii aad rabto inaad ogaato macluumaad badan oo lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan Islaamka,

Waxaan kugu casuumayaa inaad si u jeedo leh, oo maskax furan, aad u akhriso buug-yarahan iyo qaybaha kale ee taxanahan ee **"Baro Quruxda Islaamka"**, kaas oo muujinaya quruxda iyo fudaydka Islaamka.

Intaa waxaa dheer, taxanahan waxaad ku ogaan doontaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan:

- Fikradda Baraxa Tiran Ee Ilaaha Runta Ah, Eebaha Wax Abuuro.
- Abuurista Aduunka.
- Abuuristeena.
- Ujeedada Jiritaankeena.
- Ruuxdeena.
- Fikradda Cibaadada.

- Ujeedada Noolasha.
- Sida Lagu Helo Farxad Dhab Ah Iyo Raaxo Waarta.
- Meesha Ugu Dambaysa Ee Nolosha Danbe.

Sidoo kale, waxaad akhrin doontaa wax ku saabsan:

- Diinta Aadam Iyo Xaawo
- ABC-Yada Islaamka
- Ka Jawaabista Su'aalaha Muhiimka Ah Ee Aadanaha
- Magacyada Quruxda Badan Ee Ilaahay
- Waxyigii Ugu Dambeeyay
- Rasuulkii Ugu Dambeeyay

# Islaamku wuxuu si cad uga jawaabayaa su'aalaha muhiimka ah ee aadanaha

**Islaamku wuxuu si cad uga jawaabayaa su'aalaha muhiimka ah ee aadanaha, sida:**

- Maxay tahay runta kama dambaysta ah?
- Yaa na abuuray?
- Ilaah ma jiraa?
- Waa kuma Ilaaheena runta ah?
- Waa kuma Nabigii ugu dambeeyay ee Ilaahay Soo Diray?
- Yay innagu waajib tahay inaynu caabudno?
- Yaynu nahay?
- Maxaan dunidaan u joognaa?
- Maxaa dhacaaya markaan dhimanno ka dib?
- Sidee bay noqon doontaa nolosha danbe?

  Waa maxay meesha aan ku danbayn doono - Janno ama Naar?
- Sidee baan ku heli karnaa xasillooni qalbiga ah, guul, iyo farxad dhab ah?
- Sidee baan ku heli karnaa nolol waarta?





**Masjidka nabiga, Madina, Sacuudi carabiya**

# Gabagabada

Mar kasta oo aad wax badan ka akhriso Islaamka oo aad ka barato ilo sugan oo lagu kalsoon yahay, waxaad ogaanaysaa inay tahay diintii xaqa ahayd ee Aadam iyo Xaawo iyo faracooda illaa dhammaadka adduunka. Diinta Islaamku waa diin fudud, macquul ah, waadax ah, wax ku ool ah, oo dhamaystiran.

Quruxda Islaamku waa mid aan la koobi karin, maadaama ay ka timid kan aan dhammaadka lahayn ee wax abuuro.

Ilaaha xaqa ah,  waa Allaah, wuxuu Qur'aanka kariimka ah ee quruxda badan ee aan la beddeli karin ku yiri:

***{maantaan idiin kaamilay (dhammeeyey) diintiinna waxaana idiinkuu taam yeelay korkiinna nicmadayda waxaana idiinka raalli noqday islaamka diin ahaan.}*** (5:3)

Isla Allahaas xaqa ah (Eebe) wuxuu inoo sheegay in Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha ahaate) uu yahay Nabigiisii ugu dambeeyey ee rususha lagu soo qatimay, uuna u soo diray dhammaan bani-aadamka (Yuhuudda, Kiristaanka, Muslimiinta, Hinduuska, Budhiistaha, cawaanta, Caqiidooyinka mala awaalka ah, iyo kuwa kaleba.).

Ilaahay wuxuu hanuunkiisa iyo nuurkiisa siiyaa dadka oo dhan. Wuxuu daaha ka qaadaa siraha iyo furayaasha aan ku gaari karno xasillooni iyo qanaaco, iyo sidoo kale xasilooni ruuxi ah iyo mid caalami ahba.

Islaamku wuxuu ina barayaa inaanu noqono kuwo ku sifoobay cadaalad, xikmad, damqasho, daacadnimo, iyo maskax furnaan marka aynu raadinayno xaqa.

**Ogow runta iyo quruxda Islaamka!**



Masjidka Cali Jimcaale, Muqdisho, Soomaaliya

# Sharaxaada Magacyada Waaweyn ee Islaamka

**Allaah:** waa magaca saxda ah ee Ilaaha runta ah ee kaliya ee kaligi wax abuura. Waa kuwan qaar ka mid ah magacyada iyo sifooyinka Ilaahay: Allaah waa kan: Naxariista naxriista guud, waa kan Naxariista naxariista gaarka ah, waa Allaha awoodda badan, kan Qudduuska ah, kan Daahirsan, kan Barakaysan, kan ah Isha Nabadda iyo Wanaagga, kan Xaakimka ah, kan wax walba og, kan Wax kasta arka, kan wax walba maqla, kan weynaha ah kan dambi dhaafaha ah, kan sarreeya.

**Muxammad:** waa nebigii ugu dambeeyay ee Ilaahay, Ilaaha kaliya ee runta ah. Ilaahay wuxuu u soo diray Rasuulka Basharka oo dhan. Muxammad wuxuu dadka ku amray inay caabudaan Ilaahay, kan wax abuuro, oo keliya. Noloshiisa inta ka harsanayd oo dhan, Nebi Muxammad waxa uu farriintan iyo sunnaha Islaamka gaarsiiyay dadyoowga kale, wuxuu u noqday tusaale aad u wanaagsan, waxaana uu ahaa tusaale fiican oo ay ku dayan karaan bani- aadmigu.

**Qur'aanka Sharafta leh:** waa hadalkii ugu dambeeyay ee Eebbe ku soo dejiyay Nebi Muxammad. Wuxuu ka hadlayaa aqoonta qumman ee kan wax abuuro ee ku saabsan abuurkiisa. Wuxuu daaha ka qaadayaa runta wuxuuna u jihaynayaa bini'aadamka jidka runta ah. Wuxuu na barayaa oo gaarsiinayaa dadka heerka ugu sareeya ee dhanka ruuxda, akhlaaqda, garaadka, iyo heerarka bulsheed inta ay ku dadaalayaan inay fahmaan oo ku dhaqmaan manhajkiisa.



**Islaamka:** macnihiisu waxa weeye in loo hogaansamo Ilaahay oo ah Allaha runta ah. Islaamku wuxuu ina barayaa in albaabka farxadda, qanacsanaanta iyo nolosha waarta ay tahay in la rumeeyo Eebbe oo ah Ilaaha xaqa ah iyo Nebigiisii u dambeeyay ee Muxammad, laguna dhawaaqo ashahaadada: **"Waxaan qirayaa in uusan jirin mid xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee, waxaana qirayaa in Muxammad uu yahay Rasuulkii Ilaahay".** Islaamku waxa kale oo uu inoo sheegay in si fudud oo loo rumeeyo Ilaahay iyo Nebigiisa aanay ku filnayn in lagu helo xasillooni maskaxeed, farxad iyo badbaado! Sidoo kale waa in aan fulinaa doonista Ilaahay, anagoo addeecayna oo caabudayno Ilaaha wax abuuray, keligiis.

**Muslim:** waa qofka u hogaansama Alle, kan wax abuuro. Muslimiintu waxay aaminsan yihiin Allaah oo camal wanaagsana way sameeyaan. Waxay u hogaansamaan awaamiirtii ay Muxammad, Ciise iyo dhammaan nabiyada kale bareen oo ay adeecaan, sida in la rumeeyo Ilaah keliya oo xaq ah, tukashada, sujuudda iyo in lagu rukuuco cibaadada, soonka, bixinta sakada iyo sadaqada, ayna yiraahdaan "Haddii Eebbe Idmo (Insha Allah)" markay ka hadlayaan arrin mustaqbalka ah, sidoo kalena adeegsadaan salaanta Nebi Ciise iyo Nebiyada kale ee ah "nabad iyo naxariista Alle korkiina ha ahaato (Assalamu Calaykum)".

**Masjidka (Masjid):** waxaa loola jeedaa meel nadiif ah oo lagu tukado oo ay muslimiintu u isticmaalaan inta badan salaadda iyo cibaadada. Sidoo kale, Masjidku waa goob dagan oo xasiloon oo loogu talagalay in lagu xuso Alle (Ilaahay) laguna baryo, lagu akhriyo Qur'aanka kariimka ah, laguna barto tacliinta Islaamka iyo hanuunkii Nebi Muxammad. Wuxuu bixiyaa adeegyo diimeed, bulsho, samafal, iyo adeegyo waxbarasho oo anfaca bulshada.


رسول الله

# Ma xiisaynaysaa inaad wax dheeraad ah sii ogaato?

Haddii aad xiisaynayso inaad ogaato macluumaad iyo tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan Islaamka, fadlan booqo shabakadayada:

**www.discoveritsbeauty.com**

**Taxanaha Lagu Soo Bandhigayo Quruxda Islaamka:**

**1. Kaliya Tallooyinka Aysbaaga**
**2. Diinta Aadam Iyo Xaawo**
**3. ABC-yada Islaamka**
**4. Ka Jawaabista Su'aalaha Muhiimka Ah Ee Aadanaha**
**5. Magacyada Quruxda Badan Ee Ilaahay**
**6. Waxyigii Ugu Dambeeyay**
**7. Rasuulkii Ugu Dambeeyay**

**Shabakado Islaaml Ah Oo Faa'Ildooyin Badan Leh:**

http://www.allahsquran.com

http://www.quranexplorer.com

http://www.islamhouse.com

http://www.edialogue.org

http://www.islamreligion.com

http://www.newmuslimguide.com

http://www.guidetoislam.com/en/

# Qiritaanka iimaanka
## (Albaabka Islaamka)

“Waxaan qirayaa in uusan jirin mid xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee, waxaana qirayaa in Muxammad uu yahay Rasuulkii Ilaahay”.

Carabi ahaan, waxaa loo akhriyaa:

أشهد أن لا إله إلا الله وأشهد أن محمداً رسول الله

Oo sidaan loogu dhawaaqo:

**ASH-HADU ALLA ILAHA ILLA ALLAH,**
**WA ASH-HADU ANNA MUXAMMADAN RASUULU ALLAH.**

Tani waa qirida iimaanka ee loo baahan yahay inuu qofku ku dhawaaqo si uu u Islaamo; waxay soo koobaysaa xaqa, quruxda, iyo sahalka Islaamka.








GLOBAL ACADEMY FOR TRANSLATION AND EDUCATION (GATE)
LONDON | THE UNITED KINGDOM
Waxaa Turjumay Al-Andalus Group LTD
www.alandalusgroup.org

كتاب رأس الجبل الجليدي باللغة الصومالية